



## Oregon Waxa ay Dib u Eegis Ku Sameysay Shuruudaha COVID-19 ee Dib Loogu Furayo Iskuulada

Oktoobar 30, 2020

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee PPS,

Goor hore oo maanta ah [Guddoomiyaha Gobolka Brown waxay shaacisay](#) in Gobolka Oregon muujinayo khafiifinayo shuruudaha iyo heerka dib loogu furayo iskuulka oo ardaydu fasaladooda dib wax u bartaan, iyada oo laga bilaabay qaab ah in la isku dhex wado sidoo kalena la mideynayo waxbarashadii guryaha lagu qaadanayey la sii wado iyo in ay dhismayaashii iskuulada ku soo noqdaan.

Waxa hadda na soo gaadhay [shuruudihii ugu dambeeyey](#) iyaga oo aan wali dib u eegis ku sameyneyno. Sidaas darteed, waxa aan idiin sheegi kartaan kuwani soo socda:

- Qiyaasaha loo dhigay in ardaydu ay waxbarashadii fasalada ku qaataan waa la bedelay, iyaga oo waxoogaa la khafiifiyey. Kuwaasi waxaa ka mid ah in shuruudihii la xiriiray inta qof ee u soo **dhaca xanuunka** COVID-19 degmada Multnomah (sidoo kalena degmooyinka Washington iyo Clackamas, la siinayo tixgalin maadaama ay in badan oo shaqaalaha ka mid ahi ay degan yihiin), sidoo kalena la eegayo **dadka laga helo xanuunka** degmooyinkaasi.
- Xitaa qiyaasaha iyo kuwa cusub ee dabacsanaanta, tiradaasi maaha mid wali hadda degmada Multnomah ka hor istaagi karto Dugsiyada Dadweynaha Portland in ardayda fasaladii loo furo, haddii ay noqon lahayd in si dhammeystiran loogu furo ama ay qaabka isku dhafan labadaba, ilaa ay tirada COVID ay ka soo rayneyso.
- Sidii aan idinla wadaagnay mar horeba waxbarashada ardaydu guryaha ku qaadaneyso ee PPS wali waa ay sii socon doontaa ilaa bisha Janaayo 28keeda.

Guud ahaan, qiyaasahani cusubi waxa ay ina siinayaan fursad macquul ah oo aan ku bixino qaab waxbarasho oo isku dhafan ama mid sida ay u dhan tahay waxbarashadii ay ardaydu ku qaataan fasalada marka la gaaro simisterka labaad, oo ka bilaabmaya bisha Febraayo 2deeda. Sidaas darteed, wali halkaasi maynaan gaarin; tirada degmadeenu wali ma gaarin halkii la rabay iyada oo aynu u socono jiho qaldan. Waxa aan u baahanahay inaad naga caawisaan sidii taasi aynu u wada bedeli lahayn. Waxa aynu dhammaanteen qeyb ka nahay sidii aynu uga wada qeybqaadan lahayn in tirada cudurka COVID hoos ugu dhigi lahayn. Mar kasta oo aan afka duubno, oo aan dadka kalena aad masaafad ka fogaatid, ama aad raacdo tallooyinka caafimaadka dadweynaha, waxaad ka qeybqaadanaysaa sidii ay inoogu suurtagali lahayd inaan ardeydeena fasaladii ay wax ku baran jireen ku soo celino.

Ilaa inta aynu ardaydeena siin karno inay waxbarashadoodii ku qaataan qaab isku dhafan ama inay fasaladii waxbarashada ku noqon karaan, waxa aynu sii wadi doonaa inaynu raadino fursado aynu ardayda iskuulada ku soo celino iyaga oo ah kooxo kooban ah, isla markaana qabanaya hawlo kooban,



inaga oo raaceyana wixii aan bilownay mar hore kuwaasi oo ahaa in xarumaha caafimaadka ardaydeena, xannaanada caruurta iyo goobaha lagu qiimeeyo ardayda qaata waxbarashada gaarka, iyo tababaradii ciyaaraha ardayda dugsiyada sarre.

Intaasi oo dhan marka aad eegtaan, waxaa inaga go'an in [ardaydeena iyo goysaskeenu ay taageeri](#) si joogta ah inaynu sii wadno inaan qaadano tallooyinka ay ina siiyaan khabiirada caafimaadku. iyadoo aan go'aanada aan qaadaneynaa noqonayaan kuwa ay ku jirto danta ardaydeena iyo shaqalaaheenaba. Waxa aanu u heelnahay in ay ardaydeenu ay ku noqdaan fasaladoodii ay waxbarashada ay ku qaadaneeyeen iyo hoolashii iskuulada magaalada oo dhan sida ugu degdeg badan marka ay ku noqon karaan iyaga oo aan wax dhibaato caafimaad ah kala kulmeyn.

Waan idinla soo xiriiri doonaa marka aan helno warar cusub intani ka faahfaahsan todobaadka soo socda. Waxaan idiinka mahadnaqeynaa samirkiina iyo debecsanaantiina inta aynu si wada jir ah xal ugu raadineyno aan kaga guuleysayno xanuunkani. Waxa aan idiin rajeynayaa nabadgelyo todobaadkani.